



Macdanta Liidh (Lead) ee ku jirta Nidaamka Biyuha.

Macdanta Liidh(Lead) waa bir sun ah oo sababi karta dhibaatooyin caafimaad iyo kuwola xiriira habdhaqan oo wakhti dheer ah. Habka ugu badan ee ay qofka u soo gaarto liidh gudaha Minnesota waa rinjiga ku salaysan macdanta Liidh(Lead) ee guryaha la dhisay 1978 ka hor. Waxa kale oo jira habab kale oo badan oo ay qofka ku soo gaarto liidh, oo ay ku jiraan biyaha la cabbo.

Ma jiro Heer macdanta Liidh (Lead) ah oo Ammaan ah

Soo gaarista liidh waxay sababi kartaa dhibaatooyin caafimaad oo halis u ah qof kasta. Ma jiro Heer macdanta Liidh (Lead) ah oo Ammaan ah. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota (MDH) waxay ku talinaysaa in heerka liidh ee biyuhu uu ahaado mid u dhow eber intii suurtagal ah.

Soo gaarista liidh badan waxay dhaawici kartaa maskaxda, kelyaha, iyo habdhiska dareenka. Carruurta macdanta liidh waxaa kale oo ay hoos u dhigi kartaa korriinka ama waxa ay sababi kartaa dhibaatooyinka waxbarashada, hab dhaqanka, iyo maqalka.

Dhallaanka, caruurta, iyo Haweenka Urka leh ayaa Halista ugu Sarraysa ugu jira

Dhallaanka, caruurta ka yar lix sano jir, iyo haweenka huurka leh ayaa halista ugu sarraysa ugu jira in ay saamayso liidh.

- Dhallaanku waxay cabbaan biyo badan marka loo eego cabbirka inta ay leegyihin marka la barbar dhigo cauurta iyo dadka waaweyn.
- Maskaxda iyo xubnaha koraya ee dhallaanka iyo carruurta si fudud ayay u dhaawacmi karaan ama u waxyeelloobi karaan jidhkooduna aad uguma fiicna inuu iska saaro walxaha waxyeellada leh.
- Wasakheeyeyaasha qaarkood, sida macdanta liidh, waxay u gudbi karaan hooyada una gudbi kartaa ilmaha xilliga uurka.

Macluumaad dheeraad ah ka eeg [Biyaha Badbaadada u ah Cabitaanka Ilmahaaga \[PDF\]](http://www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/safebaby.pdf) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/safebaby.pdf) (kaliya waxaa lagu heli karaa Ingiriisi iyo Isbaanish wakhtigan).



Baara macdanta liidh (lead) ugu yaraan hal mar

Adiga ayaa mas'uul ka ah inaad ilaaliso badbaadada biyaha ceelkaaga oo aad tijaabiso marka loo baahdo. MDH waxay ku talinaysaa inaad isticmaasho shaybaare la aqoonsan yahay in ay baaritaan ku sameeyaan biyahaaga. La xirii shaybaar la aqoonsan yahay si aad u hesho weel muunad lagu soo qaado iyo tilmaamo, ama weydii adeegyada deegaanka ama caafimaadka ee degmadaada in ay bixiyaan adeegyo baarista ceelasha.

Shaybaarada La aqoonsan yahay ee Minnesota ee Aqbala Muunadaha ay mulkiilayaashu kasoo qaadaan Ceelka Gaarka loo leeyahay) [PDF]

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/labmap.pdf) (keliya waxaa lagu heli karaa Ingiriisiga wakhtigan).

Macluumaad dheeraad ah ka eeg Baaritaanka Ceelka, Natiijooyinka, iyo Fursadaha

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/wells/waterquality/tipsom.pdf).

Ilaali caafimaadkaaga!

Ka baar biyaha ceelkaaga:



Tijaabintu waxay u sii muhiimsan tahay haddii carruurta yaryari ay cabbaan biyaha.

MDH waxa laga yaabaa inay kugula taliso inaad ka baarto wasakhooyin dheeraad ah iyadoo ku salaysan meesha aad ku nooshahay.

Macdanta Liidhka (Lead) Sida ay ku Gasho Nidaamka Biyaha

Biyaha dhulka hoostiisa ee Minnesota caadi ahaan ma leh heerar la ogaan karo oo liidh ah Si kastaba ha ahaatee, tuubooyinka iyo qaybaha kale ee nidaamka biyaha ceelasha ee qoyska iyo tuubooyinka ayaa laga yaabaa inay ku jirto macdanta liidh (lead). Haddii ay sidaas sameeyaan, macdanta liidh (lead) waxay ku milmi kartaa biyaha. Markasta oo ay korodho muddada ay biyuhu tuubada fadhiyaanba, waxaa sii kordhaysa inta liidh ku milmaysa biyaha.

Halka ay ka timaado macdanta liidh (lead) ee ku jirta Nidaamka Biyuhu.

- **Tuubooyinka ka samaysa liidh** ayaa ah shayga ugu xun ee keenaya heerarka sarreeya ee liidhka.
- **Alxanka** liidh ayaa loo isticmaali jiray wakhti hore si la isugu dhejiyo tuubooyinka liidhka, laakiin waxay sharci darro ka ahayd Minnesota ilaa 1985kii.
- **Qaybaha naxaasta ah** sida qasabadaha, qaboojiyeyaasha, iyo afafka In kasta oo naxaastu ay inta badan ka kooban tahay heerarka liidh oo hoose ee boqolkiiba 8 ama ka yar ah, haddana waxay liidh ku milmi kartaa biyaha, gaar ahaan dhawrka bilood ee ugu horreeya isticmaalka. Haddii aad leedahay qaybo cusub oo tuubooyinka naxaasta ah oo lagu rakibay nidaamka tuubooyinkaaga, hubi inaad biyo raaciso ka hor intaadan ka cabbin. Sharciga Yaraynta Liidh ee Federaalku wuxuu u baahan yahay in inta badan tuubooyinka, qasabadaha iyo qalabka tuubooyinka, iyo qalabka lagu rakibay nidaamyada biyaha la cabbi karo Janaayo 2014 kadib waa aan ka 0.25 boqolkiiba oo liidh ah.
- **"Baakadaha" liidhka** ah oo ka sarreeya dusha sare ee ceelka ayaa caadi ahaan loogu isticmaali jiray ceelasha la qoday wixii ka horreeyey 1980kii. "Baakadaha" liidhka ah ayaa mararka qaarkood loo isticmaali jiray ceelasha la qoday ilaa 1993 (markii la mamnuucay).
- Qaar ka mid ah **baamgareeyeyaasha hoos loo quusiyo** ee la sameeyay kahor 1995 waxa laga yaabaa inay ku jiraan qaybo naxaas-liidh ah (leaded-brass). Laga soo bilaabo Janaayo 1995, dhammaan soosaarayaasha baamka hoos loo quusiyo ee Maraykanku waxay ku heshiiyeen inaan loo isticmaalin qaybaha naxaasta-liid boobka quusta.

Sida aad uga badbaadin karto Qoyskaaga

Booqo Ilaha Caadiga ah ee Liidh ka timaado

(www.health.state.mn.us/communities/environment/lead/docs/fs/commonsomali.pdf)(kaliya waxaa lagu heli karaa Ingiriisi, Soomaali, iyo Isbaanish wakhtigan) si aad u ogaato sida loo dhimo soo gaaristaadaliidhk/sunta rasaasta ee laga helo ilo aan ahayn biyahaaga la cabbo. Isticmaal tallaabooyinkan hoose si aad u yarayso soo gaarista liidhka soo gaaraya qoyskaaga ee ku jira biyaha la cabbo.

1. **U ogolow biyuhu inay** socdaan ugu yaraan 1 daqiiqo kahor inta aadan u isticmaalin cabitaanka ama wax karinta. Mar kasta oo ay in badan biyuhu ku fadhiyaan tuubooyinka gurigaaga, waa ku sii badata liidhka ku jira. Sida kaliya ee lagu ogaan karo in liidh ay ka yaraatay marka biyaha xoogaa ay furnaadaan oo daataan ayaa ah in lagu hubiyo baaritaan.

2. **U isticmaal biyo qabow** cabbitaanka, cunto karinta iyo samaynta caanaha dhallaanka. Biyaha kulul waxay sii daayaan macdanta liidh (lead) oo ka badan biyaha qabow.
3. **Baaritaan ku samee** biyaha ceelka Inta badan, u furitaanka si buyuhu ay u daataan/u furnaadaan iyo isticmaalka biyaha qabow cabbitaanka iyo wax karinta ayaa hoos u dhigaya heerka liidh ee ku jira biyahaaga la cabbo. Haddii aad weli ka welwelsan tahay macdanta liidh (lead), qorshayso shaybaar la aqoonsayahay in uu baaro biyahaaga ([Shaybaarada La agoonsan yahay ee Minnesota ee Aqbala Muunadaha ay mulkiilayaashu kasoo qaadaan Ceelka Gaarka loo leeyahay](#)) [PDF] (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/lambmap.pdf) (keliya waxaa lagu heli karaa Ingiriisi wakhtigan). Hubi inaad raacdo tilmaamaha shaybaarka ee soo ururinta muunada.
 - *Muunad laga qaaday marka hore* waxay tusinaysaa inta liidh biyahaaga ku jirta kadib markay biyuhu ku fadhiyaan nidaamka tuubooyinka ugu yaraan 6 saacadood.
 - *Muunada la nadiifiyey ayaa* waxay muujinaysaa inta liidh ee ku jirta biyahaaga ka dib markaad u ogolaato biyuhu ay socdaan hal ama laba daqiiqo.
4. **Daawee biyahaaga** haddii baaritaanku muujiyo in biyahaagu leeyihiin heerar sare oo liidh ah kadib markaad u ogolaato biyuhu ay shubmaan/socdaan. Fursadaha daaweynta waxaa ka mid ah:
 - Filtarada kaarboon ee la shahaadeeyey in ay ka saaraan liidhka
 - Reverse osmosis.
 - Sifaynta

Wax badan ka baro Websaydka Daawaynta Biyaha Guriga

(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/factsheet/hometreatment.html) (keliya waxaa lagu heli karaa Ingiriis wakhtigan).

Biyaha ceelkayga miyaan ka baaraa wax aan liidh ahayn?

Haa. Ilaha dabiiciga ah iyo hawlaha bani'aadamka labaduba waxay wasakhayn karaan biyaha ceelka waxayna sababi karaan saamayn caafimaad oo muddo gaaban ama mid dheer. Tijaabinta biyaha ceelkaagu waa habka kaliya ee loogu ogaan karo inta badan wasakhooyinka caadiga ah ee ku jira biyaha dhulka hoose ee Minnesota; ma dhadhamin kartid, ma arki kartid, mana urin kartid inta badan wasakheeyayaasha. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota waxay ku talinaysaa in laga baaro:

- **Bakteeriyada Coliform sannad kasta** iyo wakhti kasta oo biyuhu isbeddelaan dhadhanka, urta, ama muuqaalka. Bakteeriyada Coliform waxay tilmaami kartaa in jeermiska cudurada keena ay ku jiraan biyahaaga. [Eeg ka Badbaadida Bakteeriyada ku jirta Biyaha Ceelka](#) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/bacteriasom.pdf).
- **Nitrate in laga baaro sanad walba.** Dhallaanka dhalada lagu quudiyo ee ka yar lix bilood waxay halis ugu jiraan inay saameeyaan heerarka nitrate-ka ee ka sarreeya 10 milligaraam litirkii ee ku jira biyaha la cabbo. [Ka eeg Nitrite ku jirta Biyaha Ceelka](#) (www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/nitratesom.pdf).

- **Arsenik ugu yaraan hal mar.** Qiyaastii 40 boqolkiiba ceelasha Minnesota waxaa biyaha ku jira arsenik. Cabitaanka biyaha leh arsenik muddo dheer waxay gacan ka geysan karaan hoos u dhaca garaadka carruurta iyo kordhinta khatarta kansarka, sonkorowga, cudurrada wadnaha, iyo dhibaatooyinka maqaarka ee dadka waaweyn.
Eeg Arsenik ku jirta Biyaha Ceelka
(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/docs/wells/waterquality/arsenicsonm.pdf).
- **Manganiis ka hor inta uusan ilmuhu cabin biyaha.** Heerarka sareeya ee manganiis ayaa waxay sababi karaan dhibaatooyinka dhanka xusuusta, dareenka, iyo xirfadaha dhaqdhaqaaqa muruqyada. Waxaa kale oo ay dhallaanka iyo carruurta u keeni kartaa dhibaatooyinka waxbarashada iyo hab dhaqanka.
Ka eeg Manganiis-ka ku jirta Biyaha la cabbo
(www.health.state.mn.us/communities/environment/water/contaminants/manganese.html) (kaliya waxaa lagu heli karaa Ingiriisi wakhtigan).

Wasakheeyayaasha kale ayaa mararka qaarkood ku jira goobaha biyaha ee gaarka loo leeyahay, laakiin in ka yar wasakheeyayaasha kor ku taxan. Tixgeli in aad ka baartaan:

- **Isku-dhafka Kiimikooyinka Dabiiciga ah ee Sida Fudud Hawada u Raaca** haddii ceelku u dhow yahay haamaha shidaalka ama goob ganacsi ama warshadeed.
- **Kiimikooyinka beeraha ee sida caadiga ah looga isticmaalo** aagga haddii ceelku gaaban yahay oo u dhow yahay beeraha laga beero dalaga ama meelaha lagu maamulo kiimikooyinka beeraha ama uu ku yaal aagga juqraafiga nugul (sida dhagax nuuradeed jajaban).
- **Fluoride** haddii carruurta ama dhallinyaradu ay cabbaan biyaha.

Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4600.
Publications\Lead in Well Water Systems 06/15/2023 - Somali